

Sharciga 4 Nofember 1951, lamba. 1301

Ansixinta iyo fulinta Heshiska ilaalinta dalka Soomaalia ee hoos yimaada Maamulka Talyaanig, kana dhacay Ginevra ee lala gaaray Golaha Maamulka wasaayadda ee Qaramada Midoobay 27 Jannayo 1951 lagana meelmariyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 2 Dicember 1950.

Golaha Xildhibaanada Baarlamaanka iyo Golaha Odayaasha (Senatori) ee Jamhuuriyadda ayaa meelmariyeen

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYAADA TALYAANIGA
WUXUU ANSIXIYAY**

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Madaxweynaha Jamhuuriyadu wuxuu oggolaaday in uu melmariyo Heshiiska Ilaalinta dalka Soomaaliya ee hoos yimaada Maamulka Talyaaniga ee ka dhacay Ginevra oo lala galay Golaha Maamulka Wasaayadda Qaramada Midoobay 27 Jannayo 1950 oo uu meelmariyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 2 Dicember 1951..

Qod. 2

Laga soo bilaabo taariikhda la soo sheegay Heshiiska wuxuu leeyahay dhaqngal buuxa ee dhammaystiran.

Qod. 3

Sanad gudahiis marka uu xeerkanu dhaqangalo Xukuumadda Jamhuuriyaddu waxay u fasaxanyahay in ay xitaa wax ka baddasho xeerarkii jiray, xeerarka lagama maarmaanka u ah fulinta Heshiiska la soo sheegay, oo ay ku jiraan kuwa lagu nidaaminayo xiriirka Maamulka dhexe ee talyaaniga iyo Maamulka Wasayadda Talyaaniga ee Soomaaliya, sii waafaqsan mabaadiida iyo qaababka isla Heshiiska, iyo sido kale nidaamka maamulka xisaabaadka ee dalka.

Qod. 4

Maamulaha Dalka Soomaaliya ee hoos taga Maamulka Talyaaniga waxaa lagu magacaabaya dekereto Madaxweynaha Jamhuuriyadda marka Wasiirka koobaad ku soo taliyo uuna helo warbixinta Wasiirka arrimaha dibadda lana dhagaysto Golaha Wasiirada. Isagu wuxuu hoos imaanaya Wasaaradda arrimaha dibadda.

Qod. 5

Kharaska looga baahanyahay socodsiinta hawlaha Maamulka Wasayadda Soomaaliya waxaa lagu goynayaa xeer hawlgal kasta oo maaliyadeed oo lagu oggolaaday miisaaniyadda Dawladda.

Waxaa ku saabsan hawlaha socda waxaa laga bixinayya lacagaha loo qoondeeyay xaaladaha kutalgalka kharashka Wasaaradda Arrimaha Talyaaniga. Lacagahaas waxaa lagu soo warejinayaa dekereto uu soo saaro Wasiirka khasnadda, sida ay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ku soo qiyastay.

Illaa laga soo saarayo sharci maamul cusub ee xisaabeed ee la xariira qod. 3 ee la soo shegay, waxaa sii jiraya, kharashka Soomaaliya lagu bixinayo, sharciga maamulka xisaabaadka ee lagu meelmariya dekereetada Wasaaradeed 18 Juulay 1928, lamba. 4622, taasoo loo soo saaray si lagu fuliyo dekereetada 28 Juun 1928, lamba. 1642.

Kharashka Soomaaliya lagu galo waxaa la ilaalinayaa xeerarka iyo xeer nidaamiyaha lagu maamulo hantida iyo xisaabaadka Dawladda.

Xeerkan, oo wata moorka/dhaabka Dawladda, waxaa lagu darayaa uruurinta rasmiga ee xeerarla iyo dekeretooyinla Jamhuuriyadda Talyaaniga. Cid kastana waa ku waajiba in ay u hoggaansato iyo loo ilaalio ka sharci dawladeed ahaan.

Muqdisho, Roma, 4 Nofember 1951

Einaudi

De Gasperi -- Vanoni